**SHARCIGA 5 Maarso 1967, n. 10.**

**Sharciga ku saabsan Machadka Qaranka ee cilmibarista.**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

La ogeysiiyey oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Sharciga soo socda:

## Cutubka 1aad

SHARCI GUUD

### Qod. 1.
### Hey'adda cilmibarista Qaranka H.C.Q.

Machadka cilmi barista Qaranka (HCQ) Waxa uu u dhisan yahay inay yahay hay'ad lagu maamulo sharciga dawliga ah, oo leh shaqsiyad sharciyeed iyo maamul u madax bannaan.

### Qod. 2.
### Xarunta

Machadka ayaa xaruntiisu tahay magaalada Muqdisho wuxuuna ka furan karaa laamo iyo xafiisyo kale goobo kale.

### Qod. 3.
### Ulajeeddo

Machadka waxa uu leeyahay ulajeeddo:

a) — horumarinta iyo iskudubaridka barista cilmiga, ee qayb kasta oo ka mida dhaqanka iyo farsamada;
b) — ka gacan siinta dowladda sameysanka iyo fulinta qorshayaasha cilmi barista;
c) — diyarinta quman iyo dhiirigelinta wax qabadka aqoonyahannada Soomaaliyeed iyo kuwa shisheeye ee danaynaya cilmi baarista sayniska ee danaha Qaranka;
d) — kor u qaadida iskaashi dhaqameed lala yeesho machadyada Qaranka ama shisheeye oo la mid ah;
e) — qaadashada dadaal kasta oo kale oo loogu talagalay kordhinta cilmi baarista sayniska.

### Qod. 4.
### Hantida

Machadka waxa ay ka kooban tahay:

a) — laga soo bilaabo sanduuq bilow ah oo ah 1,000,000 Sh. So. oo ay dowladdu ku deeqdo.
b) — wixii tabaruc ah oo dheeraad ah, si loo kordhiyo deeqda sanduuqa, ay bixiso dowladdu, hay'adaha dalka iyo hay'adaha caalamiga ah.

c) — tabarucaada, ku xiran ama ka timaado hay'adaha gaarka loo leeyahay ama shaqsiyaadka.

**Qod. 5.**

1. Machadka waxaa uu hoos tagaa Gudi Kormeer, oo uu gudoomiye u yahay Wasiirka Waxbarashada dadweynaha oo ka kooban:
   - — Wasiirka Howlaha Guud.
   - — Wasiirka Wershadaha iyo Ganacsiga;
   - — Wasiirka Beeraha iyo naaxinta xoolaha;
   - — Madaxa Machadka Jaamacadda Somaliya;
   - — laba sarkaal ama khubaro ah, oo uu magacaabayo Wasiirka Waxbarashada Dadweynaha, oo midkood uu qabanayo shaqada xoghaye.
2. Gudiga kormeerku waxay go'aamiyaan habraaca shaqadooda ee leh qawaaniintooda gudaha.

**Cutunka 2aad**

NIDAAMINTA MACHADKA

**Qod. 6.**
**Hey'adaha**

Waxa Hey'adaha Machadka ah:

a) — Guddi, ka kooban Madaxa Hey'adda, seddex iyo toban la taliye iyo Maareeyaha Maamulka;
b) — Guddoomiyaha Machadka;
c) — Maareeyaha Maamulka;
d) — Guddiga Hanti — dhowrka, oo ka kooban Guddoomiyaha Machadka iyo laba hanti-dhawre.

**Qod. 7.**

Madaxweynaha, xubnaha Golaha, Maareeyaha Maamulka, Guddoomiyaha iyo xubnaha guddiga hanti_dhowrka waxaa XEER ku magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda kadib soo jeedinta Wasiirka Waxbarashada Dadweynaha marka ay dhageystaan Golaha Wasiirrada iyadoo la tixraacayo oo keliya Guddiga hanti — dhowrka, sidoo kale marka uu dhegeysto Wasiirka Maaliyadda.

**Qod. 8.**
**Muddada xil heynta**

Madaxa Hey'adda, la taliyayaasha, Mareeyaha Maamulka, sodo kale madaxa iyo xubnaha Golaha Hanti — dhowrka waxaxilkoodu socon seddax sano, oo dib loo cusbooneysiin karo.

**Qod. 9.**
**Ka noqosho iyo beddelid**

Ka noqosho, beddelid iyo cusbooneysiinta xilka waxa loo maraa isla habka lagu xusay mgacaabidda.

**Qod. 10.**
**Ka hadlidda dhaqaalaha**

Macaamilka dhaqaalaha ee xilalka kor lagu soo sheegay waxa lagu meel mariyaa wareegtada Wasiirka koowaad, marka uu arko soo jeedinta Wasiirka Waxbarashada dadweynaha, dhegeystana Guddiga kormeerka.

**Qod. 11.**
**Kartidarro**

Shaqooyinka Madaxa Machadka, Maareeyaha Maamulka, la taliyayaasha, Madaxa iyo Xubnaha Golaha Kormeerka Xisaabaadka, la mid maaha Xildhibaan, Garsoore, Guddoomiye Goboleedka, maamulayaasha kale ee Hey’adaha dowladda.

**Qod. 12.**
**Shuruudaha**

1. Madaxa Hey’adda, Maareeyaha Maamulka, Madaxa iyo Xubnaha Guddiga Kormeerka waa in laga dhex doortaa dad leh awood gaar ah iyo khibrad xagga maamulka iyo maareynta.
2. La taliyayaasha waa in laga dhex doortaa aqoonyahannada caamka ah - degaanka - ama khubaro - kuwaas oo ku caddeeyey cilmi fidin ama cilmi baaris waxyaabaha Soomaliya u baahan tahay ee qaybaha shrciga, sheekooyinka bulshada, xisaabaadka ama dabiicadda.
3. Madaxa Hey’adda, Maareeyaha Maamulka iyo Madaxa Guddiga Kormeerka xisaabaadka waa in ay noqdaan mudiniin Soomaaliyeed.
4. Tirada ajaanibta ah ee ka tirsan guddi machad kama badnaan karaan seddex meelood meel tirada guud.

**Qod. 13.**
**Howlaha Madaxa**

1. Madaxa Machadku waxa uu wakiil ka yahay xiriirka machadku la leedahay dowladda, hay'adaha kale ee dowladda iyo shakhsiyaadka ama kuwa sharciyeedka gaarka ah.
2. Waxa uu kulmiyaa shirguddoomiyaana Golaha, waxa uu dejiyaa ajandaha shirka, waxa uu hagaa doodaha shirka iyo codbixinta la xariirta.
3. Haddii uu maqnaado ama uu carqalad la kumo, Madaxa waxa lagu beddelaa si ku meelgaar ah shaqadiisa hal lataliye waqti ka waqti oo uu magacaabo Goluhu.

**Qod. 14.**
**Hawlaha Golaha**

Goluhu wuxuu dejiyaa tilmaamaha iyo barnaamijyada cilmi baarista iyo howlaha waxqabadka ee Machadka: waxa uu ka baaraandegaa kuwa ugu muhiimsan in la qaato, iyada oo la dhowrayo awoodda ay xaddiday dowladu; wuxuu eegaa maaliyadda, iyadoo la raacayo qodobka 21; wuxuu ogolaadaa qawaaniinta Machadka, iyadoo la raacayo qodobka 23; iyo howlaha kale ee lagu aaminay sharciga iyo qodobbada qaanuunka.

**Qod. 15.**
**Howlaha Maareeyaha Maamulka**

1. Maareyaha Maamulka ayaa hubiya hirgelinta maamulka ee tilmaamaha guud iyo go’aannada midmidka ah ee Goluhu qaato.
2. Asagu waa madaxa shaqaalaha Maamulka; iyo awooddan waxay soo saartaa bixinta lagama maarmaanka u ah ujeeddadan, ka dib marka uu dhegeyst Guddiga xaaladaha ay dejiyeen qodobbada qaanuunka.
3. Marka uu maqnaado ama carqalado la kulmo, Maareeyaha waxa lagu beddalaa si ku meelgaar ah shaqooyinkiisi hal la taliye ama sarkaal oo uu magacaabo Madaxweynaha.

**Qod. 16.**
**Hawlaha Guddiga Hantidhawrka**

1. Guddiga hantidhowrku wuxuu ka shaqeeyaa xakameyn gudaha ah ee xisaabaadka Hay'adda, bayaannada maaliyadeed iyo maareynta maamulka.
2. Waxay baaraan bugaagta Hey’adda iyo dukumiintiyada xisaabaadka; kormeer xafiisyada; hubntai isku dheelitirka; wuxuuna dejiyaa indha indhaynta iyo soo jeedinta arrintaan la xiriirta.
3. Marka uu maqnaado ama carqalad la kumo guddoomiyaha hantidhowrka waxa lagu beddelaa si ku meelgaar ah shaqadiisa Kormeeraha ugu khibradda badan Golaha uguna da’ weyn.

**Qod. 17.**
**Kulamada iyo doodaha Guddiya kulliyadeedka**

1. Kulanka ugu horreeyay ee Golaha iyo guddiga hantidhowrka waxaa ugu yeera Madaxweynaha muddo shan iyo toban maalmood gudahood ah marki la magacaabo. Kulamada xiga ee Golah iyo guddiga hantidhowrka waxaa isugu yeeraya gudoomiyaasha markasta oo ay taasi lagama maarmaan noqoto.
2. Golaha waa in ay kulmaan ugu yaraan bishiiba mar; Guddiga hantidhowrkuna ugu yaraan saddexdii biloodba hal mar.
3. Hawlaha Xoghayaha Golaha iyo kuwa Xoghayaha Hantidhawrka waxaa fuliya mid ka mid ah xubanaha, ama sarkaal uu magacaabay Madaxweynaha ixtiraamka mudan.
4. Si ay go’aamada Golaha iyo guddiga hantidhowrka ansax u noqdaan waa lagama maarmaan sida ay u kala horreyyan joogitaanka ugu yaraan sideed ama ugu yaraan labo xubnohooda la xiriira.
5. Go'aannada Golaha iyo Guddiga Hantidhawrka waxaa lagu qaataa cod aqlabiyadda ah

inta shirka  ka soo qaybgashay.
Haddii ay dhacdo sinnaan, codka madaxweynaha ayaa guushu raacdaa.

**Qod. 18.**
**Saxiixa dukumintiga**

Saxeexa dukumiintiga waxaa loo wareejiyay Madaxa Machadka ama Maareeyaha Maamulka, midwalba meeshiisa marka laga reebo wakiilashada gudaha, iyada oo la raacayo Sharciga.

**Qod. 19.**
**Ku tiirsanayaasha Machadka**

"Xaaladda" Sharciga iyo dhaqaalaha iyo shuruudaha adeegga shaqaalaha ku tiirsan Machadka waxa lagu asaasay qawaaniin gaar ah, oo uu ansixiyay Wasiirka Waxbarashada Dadweynaha kadib soo jeedinta Guddiga Maamulayaasha.

## Cutubka 3aad

MAAREYNTA MAALIYADEED EE MACHADKA

**Qod. 20.**
**Sannad Maaliyadeed**

Sannad maaliyadeed waxa uu bilowdaa kowda jannaayo waxa uuna dhammaadaa 31 disembar.

**Qod. 21.**
**Miisaaniyadda**

1. Laga bilaabo Maarso 31 ee sannad kasta, soo jeedinta Maareeyaha Maamulka, Guddigu wuxuu baarayaa isku dheelitirka ugu dambeeya ee sannad maaliyadeedkii hore, wuxuuna u diraa jawaab celin Golaha Hantidhowrka iyo warbixin sawir oo uu saxeexay Maareeyuhu.
2. Bisha gudaheeda kadib wareejinta, Guddiga hantidhowrka ayaa hubiya warbixin maaliyadeedka  haraagga waxayna u diraan warbixintooda Guddiga Kormeerka.
3. Guddiga Kormeerka, marka ay dhageystaan meeshi loo baahdo,Garsooraha xisaabaadka waxay si cad u ansixinayaan qorshaha maaliyadeed.

**Cutubka 4aad**

QAWAANIINTA KU MEELGAARKA AH IYO KUWA KAMA DAMBEYSTA AH

**Qod. 22.**
**Qaanuun**

Qaanuunka Hay'adda waxaa XEER ku soo saaray Madaxweynaha, kadib soo jeedinta Wasiirka Waxbarashada Dadweynaha, oo dhageystay Golaha Wasiirrada; waxaana wax looga beddeli karaa isku qaababkaas, oo ku saabsan hindisaha Golaha ama Guddiga Kormeerka.

**Qod. 23.**
**Qawaaniin**

Qaab dhismeedka qaanuunkan iyo qodobbada lagu asaasay, Guddigu waxa uu ansaxiyaa xeerarka Hay'adaha, oo wax ku oolnimadiisu ay ku xiran tahay oggolaanshaha Guddiga Kormeerka.

**Qod. 24.**
**Iskuduwidda sayniska**

Markii la dhaqan galiyo sharciga cusub ee asaasidda Jaamacadda Ummadda Soomaliyeed, Machadka Qaranka ee cilmi baarista, isaga oo lahaanayo maamulka iyo xisaabinta madax_bannaanida, wuxuu si joogto ah ugu xirnaan doonaa qobka Jaamacadda, sida isla sharcigu tilmaamay.

**Qod. 25.**
**Marka uu dhaqan galo**

Sharcigaan waxa uu dhaqan gelayaa maalinta xigat marka uu ku soo baxo qoraalkiisu faafinta rasmiga ah.

Sharcigan, oo wata shabbadda Dowladda, waxaa lagu dari doonaa soo ururinta rasmiga ee sharciyada iyo Go'aannada Jamhuuriyadda.

Waa ku waajib qof kasta oo leh mas'uuliyad in uu dhowro una arko inuu yahay sharci u yaal dowladda.

Muqdisho, 5 Maarso 1967.

**ADEN ABDULLAH OSMAN**

Wasiirka Koowaad
ABDIRIZAK HAGI HUSSEN
Wasiiraka dhaqaalaha
ALI OMAR SCEGO
Wasiirka Waxbarashada Dadweynaha
KENADIT AHMED IUSUF